

KUSOO DHAWOOW QAYBTA XANAANADA CARUURTA!

Iskuulka St Mary's qaybta xanaanada (Rasabshanka iyo Narsariga) waxay sameeyaan sida loo wada cayaaro oo loo wada shaqeeyo iyo waliba sida ay u ogaan lahaayeen aduunkan ay kunool yihiin waxa uu yahay.

Waxaa ilmaha wax lagu baraa fasalka gudihiisa iyo baaxada lagu cayaaro, taasoo lagu baro farxad galin iyo waliba ilmaha oo lagu dhiiri galinaayo inay waxqabad ku shaqeeyaan iyadoo la isticmaalayo qaab dhismeedka Early Years Foundation Stage. Waan qiimaynaa ciyaarta inay tahay mid wax lagu barto ahnana qalab wax lagu qiimayn karo.

HADAAD ISKUULKA KU CUSUB TAHAY

Waan fahmi karnaa in Iskuul cusub inaad bilaawdaan ay aad ugu adagtahay adiga iyo ilmahaagaba. Waxaan Iskuulka St Mary's haysanaa siyaasad noo saamaxaysa in si fudud aan dhib lahayn aan udhamayno arinta ah in ilmaha inay Iskuulka la qabsadaan oo guri joogidii ay ilaawaan ay ufududaato.

Waan qiimaynaa kaalmaynta iyo caawimaada aan kahelno waalidiinta oo ku saabsan xaga waxbarashada ilmaha. Waana soo dhaweeynaynaa wixii aad nagu soo kordhinaysaan.

SAFAR/BOOQASHO

Ilmaha dhigta qaybta xanaanada Narsariga iyo Rasabshanka waxaa la geeyaa oo loo wadaa safaro/booqasho oo lagu barayo waxyaabo ku saabsan waxbarashada, una saamaxayso ilmaha inay qibro kordhistaan

SI FARXAD LEH AYAAN USUGAYNAA INAAN IDINLA KULANO OON IDINKU SOO DHAWEEYNAYNAA ADIGA IYO ILMAHAAGABA.